AKADEMISKA SJUKHUSET



# In la umullo iyadoo ilmaha lagugu soo jeexay (uurdooxa/qalitaanka dumarka ilmaha lagaga soo saaro) la isticmaalaayo

Macluumaad






## Miyaad su'aalo qabtaa, la xiriir:

Su'aaluhu ma waxay khuseeyaan isqoritaanka ama maalinta qalliinka?

Wac qeybta BB-da ee 96 E/C2 018-611 56 93

Miyaad u maleyneysaa inay fooshii bilaabmatey?
Wac qeybta dhalmada 018-611 57 00



Bogga rog si aad wax dheerad ah ugu akhrido!

REGION UPPSALA

# In la umullo iyadoo ilmaha lagugu soo jeexay (uurdooxa/qalitaanka dumarka ilmaha lagaga soo saaro) la isticmaalaayo

Anaga hadafkayagu waxa weeye inaanu gacan ka geysano sidii dareenka dhalmada qaliinku/lagugu soo qallay ay ugu noqoto sida ugu wanaagsan ee ugu suurtogalsan.

# Markaad is qoreyso

Soo qaado ID sawir leh. Waxaad la kulmi doontaa umuliso/kalkaaliso hoose, dhakhtar iyo dhakhtarka suuxinta oo macluumaad kaa siin doona dhalmada qalliinka.
Kantaroolida diyaargarowga ah ayaa la sameeyaa. Waxa la filayaa in booqashadu noqoto mid subaxda oo dhan qaadato.

# Ka hor intaanad qaliinka laguu sameynin

- Wakhtiga lagu siiyey waa mid kumeel gaar ah. Waxa mararka qaarkood yimaada xaalado keena inaanu u baahano in wakhtiga qalliinka dhalmada la bedelo, markaas ayaanu kula soo xiriiri doonaa.
- Ha xiirin timaha xubnaha taranka todobaadka qalliinka ka horeeya maadaama oo ay taasi kor u sii qaado halista infegshanka.
- Soo qubeyso habeenka qalliinka ka horeeya iyo subaxda maalinta qalliinka, isticmaal saabuun caadi ah. Si fiican ugu nadiifi xudunta iyo goljilicda (meesha u dhaxaysa caloosha iyo laabadka bowdada). Mid ka mid ah labadaas goor, waa inaad sidoo kale timaha dhaqdaa.
- Xamuurada iska tirtir. Dahab ha soo xidhan.
- Xidho dhar nadiif ah markaad gubeysato ka dib, goyaal nadiif ah sariirta iska saar.
- Waa inaad soo soonto, waxa looga jeedaa inaan waxba la cunin laga bilaabo 24 saacood qalliinka ka hor, oona tubaako la isticmaalin. Waxaad cabi kartaa biyo iyo cabitaan saafi ah ilaa iyo qiyaas ahaan 2 saacadood ka hor wakhtiga lagu sheegay inaad maalinta qalliinka cisbitaalka joogto.
- Subaxda maalinta qalliinka markaad waadhka ku bedelanayso ayaad sharabaadada taageerada ah gashaneysaa. Waxa sababataa xitaa la isticmaalaa muddada daryeelka si khatarta xinjirowga dhiigga loogu yareeyo.

# Lamaanaha/qaraabada

Lammaanaha/qaraabada ee qeybta BB u hoyanaaya waxay bixinayaan 450 karoon/maalintii, taas oo la iskugu soo diri doono warqada lacagta lagu bixiyo (inbetalningskort). Waxa qiimaha ku jira quraac, qado, casho iyo qaxwaha fiidkii.

- Dhar u soo qaad xitaa lamaanaha/qaraabada. Waxa la doorbidayaa funaanad leh suusad/shaati si gacan looga geysto xiriirka dubka dubka u saarida ee ilmaha.
- Ma lehin wax fursad ah oo aanu ku bixino tallaagad ama makiinadda cuntada lagu diiriyo (mikrovågsugn) intaad qeybta BB ku jirto covid-19 dartiis.

# Maalinta qalliinka

Maalmo/dhowr maalmood ka hor qaliinka, ayuu idin soo wici doona isku dubaridaha qaliinku. Waxa kadibna la idin ogeysiin doonaa waqtiga aad meesha joogi doontaan iyo halka aad aadi doonto. Waxaad ku soo dhawaan doontaan Kvinnokliniken ingång 95/96, iyo dabaqa uu isku dubaridaha qaliinku idinka idiin sheego. Anaga ayaa idin qaabili doona oo qolka idin tusi doona. Sida loo kala horeeyo qalliinka dhalmada waxay ku xidhan tahay tilmaamaha caafimaadka.

Waxa qeybta ka dhacaaya waxyaabahan soo socda:

- Baaritaan caadi ah
- Dareerahu meel ay ka soo baxaan
- Xanuun jabiya caadi ah iyo antibiyootig ayaa qaliinka ka hor la isa siinayaa.

Marka qalliinka la sameynaayo:

- Kamarad/telefoon oo aan internetka ku xirneyn ayaa la soo qaadan karaa.
- Lamaanaha/qaraabada ayaa la tusayaa meesha ay ku bedelanayaan.
- Waxa dawada suuxdinta sameynaaya dhakhtarka suuxdinta.
- Kateeterka/tuunbada kaadida qaada waxa galinaaya umulisada.
- Ka hor intaanu qallinku bilaabmin ayaa kantarool buuxa loo sameyn doonaa si loogu hubiyo inaanad ka fal celin/dareemin kicinta xanuunka ee aagga qalliinka lagu sameynaayo.
- Qaliinku waxa uu qaadanayaa 20-40 daqiiqo. Haddii qalliin hore laguu sameeyey ayaad wakhti ka badan isku imaanshahu/isku bogsashadu qaadan kartaa.

# Isla daryeelida

Anaga hadafkayagu waxa weeye in ilaa inta ugu badan ee ugu suurtogalsan la isla daryeelo hooyada iyo ilmaha iyo wadajir lammaanaha/qaraabada saacadaha ugu horeeya ee qalliinka ka dib. Isla daryeelidu waxay ka dhacaysaa qeybta soo kicista.

**Shuruudaha isla daryeelidu waxa weeye inaan wax aan lagu talogelin oo lama filaan ahi aysan dhicin inta lagu jiray qalliinka hooyada iyo ilmaha.** Haddii aan shuruudaha isla daryeelka la buuxin ayaa ilmaha lala dareelayaa lammaanaha/qaraabada oo dubka dubka loogu saarayaa qeybta dhalmada/BB iyadoo adigana lagugu ilaalinaayo qeybta soo kicista.

# Marka qaliinka dhalmada laguu sameeyo ka dib

Waxaad qeybta dhalmada/BB-da ku soo laaban doontaa markaad ka soo roonaato ee aad lugaha dib u dhaqdhaqaajin karto. Ka fikir in dhaqdhaqaaqu muhiim yahay oo aad sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah aad sariirta uga soo kacdo. Dhowr saacadood kadib ayaad bilaabi kartaa cabitaanka iyo cunista wax fudu.

# Xanuun jabiye

Xanuun jabiye wanaagsan ayaa muhiim ah si loogu awoodo in ilmaha la daryeelo, oo uu kuugu fududeeyo **dhaqdhaqaaqa** kaas oo kobciya bogsashada, oo sidoo kalena fududeeya in **xilli hore kateeterka kaadida lagaa saaro** (qiyaastii 8 saacadood qalliinka ka dib) si looga hortago infegshanka kaadi mareenka. Iyadoo la isticmaalaayo waxa loo yaqaano miisaanka VAS-ka, ayaad qiimeyn ku sameyn doontaa intuu xanuunkaagu leegyahay, qiimeynta laga bilaabo 0-10, ka hor iyo ka dib markaad xanuun jebiyaha qaadatey. Marka laga reebo xanuun jabiyaha aasaasiga ah ee qaab ahaan kiniiniga ah, ayaad sidoo kale 24-ka saacadood ee ugu horreeya u baahan kartaa xanuun jabiye dheeraad ah, taas oo ah mid shakhsiga lagu saleeyey.

## Aadida guriga

Waxa ku fasaxi doona dhakhtar iyadoo aad markaas heli doonto fursad aad kala hadasho qalliinka iyo su'aalaha kale ee aad qabto. Waxa caadi ah in cisbitaalka la joogo qiyaas ahaan laba maalmood qaliinka dhalmada ka dib haddii labadiinuba aad caafimaad qabtaan.

### 1177

Waxaad macluumaad iyo adeeg ku saabsan caafimaadkaaga iyo daryeelkaaga ka helaysaa bogga 1177.se. Wixii talobixinta caafimaadka wac 1177, kaas oo furan habeen iyo maalinba.

### La soo xiriir Akademiska

Waxa Cisbitaalka Akademiska lala soo xiriirayaa iyadoo la soo maraayo:
patientkontakt@akademiska.se
Patientkontakt 018-611 30 33,
Khadka gudbinta telefoonka: 018-611 00 00
www.akademiska.se